SOLJA
SOMALILAND JOURNALIST ASSOCATION
BEHIND EX-UNICEF OFFICE, SHACAB AREA TEL: 572604/00 252 63 4194200
E-MAIL: SOLJAJOUR@GMAIL.COM WEBSITE: HTTP://WWW.URURKASOLJA.ORG HARGEISA, SOMALILAND

Somaliland Journalist Association (SOLJA)

Siyaasadda Xubinimada

Nooca Siyaasadda	Daabacaadii 1aad	Insert number
Siyaasadda Xubinimada	Waxa la ansixiyay	
Qofka Masuuliyadda qaadaya	Taarikhda dib u egista loo balansan yahay	

Taariikhda Hirgalinta: March 2016

TUSMO

1. Hordhac 3

2. Gogol-dhig 3

2.1. Cidda ay khusayso 3

2.2. Ujeeddada Siyaasadda 3

2.3. Ujeeddooyinka gaarka ah ee Siyaasadda 4

2.4. Qeexid: 4

2.5 Guddida maamulka diiwaangelinta iyo xubinnimada: 5

3. Qaabka Xubinnimada 5

3.1 Shuruudaha: 5

3.2 Codsiga Xubinnimada 6

3.3 Hannaanka qiimeynta codsiyada xubnaha 7

3.4 Aqbalaadda xubinnimada 8

3.5 Diidmada xubinnimada 8

3.6 Heerarka iyo noocyada kaadhadhka xubinnimada 9

3.7 Xuquuqda xubnaha ansaxay; 10

3.8 Dib u cusboonaysiinta Xubinnimada 10

3.9 Waayitaanka Xubinnimada 11

4. Qaadhaan Bixinta xubinnimo iyo Waajibaadkeeda. 11

4.1 Qaababka Qaadhaanbixinta: 12

5. Dib u Eegidda Siyaasadda 12

6. Faafinta Siyaasadda. 12

1. Hordhac

Ururka Saxafiyiinta Somaliland ee SOLJA, isaga oo ka duulaya tayaynta iyo dhawrista xuquuqda Saxafiga, waxa uu hore u diiwaangeliyay, isla markaana kaadhadhka aqoonsiga saxafinnimo guddoonsiiyay tiro badan oo ka mid ah hawlwadeennada warbaahinta ee ka hawlgala Jamhuuriyadda Somaliland. Ururku isagoo ku salaynaya asbaabaha uu u aasaasan yahay iyo waajibaadka shaqo ee uu u hayo hawlwadeennada xubnaha ka ah, waxa uu saxafi kasta u diiwaangelinayaa si waafaqsan shuruudahan, si loo helo saxafi tayo leh, isla markaana la dhawro xaqiisa iyo waajibaadka saaranba.

Shuruudahani waxay waafaqsan yihiin qodobka 7aad ee dastuurka oo tilmaamaya hannaanka diiwaangelinta xubnaha ururka. Ujeeddada laga leeyahay diiwaangelinta ayaa ah sida waafaqsan qodobka 8aad ee dastuurka ururka oo tilmaamaya xaqa uu helayo qofka xubinta ka ah ururka.

2. Gogol-dhig

Jiritaan-la'aanta diiwaan sax ah oo lagu kaydiyo xogta xubnaha ururka, isla markaana tilmaamaya xubinnimada ururka, ayaa keentay culays xilliyadii kala dambeeyay ee shirweynayaashii Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA) ee 2014 iyo 2017, taas oo sababtay in aan si sugan loo helin xogta saxafiyiinta ka hawlgala Somaliland iyo in la sugo xaqa uu saxafigu leeyahay iyo waajibaadka saaran oo ay ka mid tahay in uu xaq u yeesho ka qaybgalka shirweynaha, isla markaana yeesho xaqa in la doorto iyo in uu wax doorto labadaba. Si caqabadahaas meesha looga saaro, isla markaana loo dhawro xaqa saxafiga, lana caddeeyo waajibaadka saaran ee xubinnimo, waxa lagama maarmaan noqotay in la helo siyaasad xubinnimo oo dhammaystiran.

2.1. Cidda ay khusayso

Siyaasaddani waxaa lagu dabbaqayaa dhammaan xubnaha Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA) iyo hawlaha la xidhiidha diiwaangelintooda, xuquuqdooda iyo waajibaadka saaran.

2.2. Ujeeddada Siyaasadda

Ujeeddada siyaasadani waa in la qeexo Siyaasadda Xubinnimada ee SOLJA iyo qaababka loo maamulayo xeerhoosaadka, waxyaabaha uu xaqa u yeelanayo, heerka qaadhaan ee uu kaga mid ahaanayo Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA).

Siyaasaddani waxay xoojinaysaa awoodda saxaafadda, iyada oo la dhiirrigelinayo dhismaha iyo tayaynta hay'ad ahaaneed.

2.3. Ujeeddooyinka gaarka ah ee Siyaasadda

Ujeeddada gaarka ah ee siyaasaddani waa inay fududayso qaabka diiwaangelinta saxaafadda iyo inay caawiso gaadhista heerka waxqabadyada xubinnimada ee SOLJA. Ujeeddada siyaasaddani waxa ka mid ah:

I. Sharcinimada qaababka diiwaangelinta xubinnimada.
II. Xoojinta masuuliyadda saxafiyiinta, iyada oo la ilaalinayo heerarka waxqabad iyo ilaalinta xeer hoosaadyada.
III. In saxafigu ka fogaado dhammaan xubinnimada Xisbiyada siyaasadda iyo ururrada kale ee Saxaafadda ee SOLJA la mid ah, kuwaas oo keeni kara khilaafyo mihnadeed iyo kuwo daneed, sida uu dhigayo Dastuurka ururku.

2.4. Qeexid:

Xubin: Xubin walba oo buuxisa shuruudaha xubinnimada ururka ayaa loo aqoonsanayaa xubin.

Warbaahinta: Isku darka qalab walba oo loo isticmaalo inuu sahlo xog isgaadhsiineed.

Xubin ansax ah: Xubin wal oo si dhamaystiran u bixisay/bixiyay waajibaadkii maaliyadeed, adeecdana xeerhoosaadyada, siyaasadda xubinimada, xeerka anshaxa iyo akhlaaqda ayaa loo tixgalinaayaa xubin ansax ah.

Xubin aan ansax ahayn: Xubin walba oo ku guul-darraysata inay bixiso qaadhaanka xubinimada inta u dhaxaysa maalinta la diiwaangeliyo illaa shirweynaha. taariikhda shirwaynaha guud.

2.5 Guddida maamulka diiwaangelinta iyo xubinnimada:

Si looga midho dhaliyo diiwaangelinta saxafiyiinta ee xubnaha ka noqonaya SOLJA, waxa siyaasaddani aasaasaysaa guddi halkan loogu yeedhi doono, 'Guddida maamulka diiwaangelinta xubnaha iyo xubinnimada'.

I. Guddidan waxa magacaabay guddoomiyaha SOLJA, sida uu waajibnayo qodobka xxx ee dastuurka ururka SOLJA.
II. Guddiga maamulka Xubinnimadu waxay ugu yaraan ka koobnaanaysaa 3 Xubnood.
III. Xubin wal oo ka mid ah guddiga xubinnimadu waa inay ka tirsanaataa Boardka SOLJA.
IV. Guddiga Xubinnimadu waxay adeegsan karaan xubno farsamo oo dibedda ah amma ka tirsan hawlwadeennada xafiiska.

3. Qaabka Xubinnimada

Qaababkan waxaa looga dan leeyahay inay hagaan qaabka hawlqabasho ee xubinimada iyo diiwaangalinta ee SOLJA: -

3.1 Shuruudaha:

Qof kasta oo la diiwaangelinayaa waa inuu yahay qof buuxiyay shuruudahan;

I. Saxafiga la diiwaangelinayaa waa inuu yahay saxafi reer Somaliland ah

II. Xubnaha ka shaqeeya waaxda warbaahinta, kuwaas oo higsi, aragti dheer iyo ujeeddooyinba la wadaaga SOLJA, waa loo ogol yahay inay xubin ka noqdaan SOLJA iyaga oo buuxinaya shuruudahan.

III. Saxafi kasta oo da'diisu tahay 18-jir iyo ka weyn wakhtiga codsiga, shuruudahanna buuxinaya.

IV. Tifaftireyaasha iyo mulkiilayaasha doonaya horumarinta warbaahinta.

V. Waa inuu yahay qof aqoontiisu gaadhsiisan tahay heer jaamacadeed, sida derejada koowaad ee waxbarashada jaamacadda (Bachelor) amma haystaa Diploma, Certificate iyo/amma dugsi sare dhigtay oo shahaadadeeda haysto.

VI. Inuu leeyahay khibrad ugu yaraan 3 sannadood ah oo saxaafadda ah, kana soo shaqeeyay hay'ad warbaahineed la aqoonsan yahay amma la garanayo inay si

joogto ah u shaqayso, amma uu si madax bannaan ugu hawlgalay saxaafadda muddadaas.

VII. In uu aaminsan yahay, una hoggaansamo mabaadii'da Ururka iyo hufnaanta mihnadda saxaafadda.

VIII. In uu diyaar u yahay bixinta qaadhaanka ururka, si waafaqsan qodobka 11aad ee dastuurka ururka oo waajibanaya in qof kastaa si siman u bixiyo lacag qaddarkeedu yahay 20,000 (Labaatan Kun oo shilin) bishii hal mar.

IX. Qofku waa inuu bixiyaa lacagta isdiiwaangelinta oo dhan shan dollar amma 50 kun oo shilin oo Somaliland ah.

X. Muddada kaadhku waxay noqonaysaa sannad buuxa oo ka bilaabmaya wakhtiga la siiyay qofka.

XI. Qofka uu ka dhaco isaga oo aan lacag bixinin, marka laga yimaaddo inuu marayo shuruudaha kale ee u deggen, haddana mid cusub lama siinayo illaa uu soo buuxiyo shuruudaha, isla markaana uu soo bixiyo wixii lacag ku baaqday.

XII. Dhamaan xubnaha la diiwaangelinayaa waa inay aqbalaan odhaahdan qiraalka ah, isla markaana saxeexaan. Odhaahda aqoonsiga ee xubintu waxay u dhigan tahay sidan:
"Xubin ahaan waxaan aqbalay inaan addeeco xeerhoosaadyada SOLJA, siyaasadda xubinimada, xeerka anshaxa iyo dastuurka ururka SOLJA. Waan fahansahay ka mid ahaanshaha SOLJA inay ii tahay sharaf, xubinimadana kaliya lagula noqon karo sabab cad. Waxaan diyaar u ahay inaan helo xuquuqda ii sugnaatay xubinnimadayda ka dib, isla markaana fuliyo waxa igu waajibay marka la ansixiyo xubinnimadayda. Waxaan aqbalayaa ka qayb ahaanshaha SOLJA aniga oo miyirkayga iyo maankaygaba qaba, diyaarna u ah in ficilladayda, hab-dhaqankayga iyo qaab shaqeedkaygu aanay ka hor imanaynin sharciga iyo sumcadda mihnadeed midna.

Magaca: _____,Saxeexa:_____ Taariikhda:_____

3.2 Codsiga Xubinnimada

Qof walba oo buuxiya shuruudaha, doonayana inuu codsado si uu u xubin uga noqdo ururka SOLJA, wuu codsan karaa xubinnimo, si sharciga waafaqsan.

I. Qofka saxafiga ah ee soo codsada xubinnimada, waxa guddida maamulka diiwaangelinta xubnuhu amma xafiiska u xilsaarani uu siinayaa hagayaal qeexaya waxyaabaha laga rabo qofka xubinnimada doonaya (Shuruudaha), si qofku ugu go'aan qaato inuu xubin ka noqdo SOLJA.
II. Codsaduhu waa inuu soo gudbiyo codsi dhammaystiran.
III. Codsaduhu waa inuu hubiyaa in foomka codsigu yahay mid dhammaystiran oo sida xog sax ah.
IV. Foomka codsiga oo dhammaystiran, isla markaana saxeexan oo ay la socoto qaadhaanka oo ah 20,000 SLSH, ayaa loo soo gudbinayaa Xafiiska diiwaangelinta SOLJA ee Hargaysa, sida ku cad shuruudaha siyaasaddan iyo sharciga ururkaba.
V. Si aad u noqoto xubin amma aad u cusboonaysiiso xubinnimada ururka, xubin walba waxa looga baahan yahay inay hirgeliso ku-dhaqanka siyaasaddan iyo sharciyada kale ee ururka u yaalla.
VI. Xubinnamada ururka waxa ka dhalanaya waajibaad xubinta saaran iyo xuquuq uu ururka ku leeyahay, waxaana saldhig u ah ku dhaqanka sharciga, ilaalinta anshaxa iyo ka-fogaanshaha wax kasta oo sababaya in qofka mihnaddiisa iyo sumcadda ururkuba ay wiiqmaan.
VII. SOLJA waxa ka go'an in ay gaadho heerka ugu sarreeya ee anshax iyo akhlaaqeed. SOLJA waxay aaminsan tahay in xubin walba waajibkeedu yahay inay qaaddo masuuliyadda anshax iyo dhaqan ee ka saaran anshaxa mihnadeed ee shaqsiga ah iyo ta sumcadeed ee ururka.
VIII. Xubnaha gobollada dalku waxay diiwaangelintu ugu tegaysaa goobaha ay joogaan, gaar ahaan magaalooyinka waaweyn. Xubnahaasi waxa saaran muddada diiwaangelintu u furan tahay inay ka faa'iidaystaan oo ay isdiiwaangeliyaan, isla markaana iyagoo raacaya hagaha iyo shuruudaha ay buuxiyaan foomka codsiga, si waafaqsan sharciga iyo siyaasadda.

3.3 Hannaanka qiimeynta codsiyada xubnaha

I. Codsiyada waxa qabanaya guddida maamulka xubinnimada iyo diiwaangelinta, iyada oo loo raacayo hannaanka siyaasaddan ee qeexaya awoodaha guddida, sida ku cad qodobka ay ku aasaasan tahay guddidani ee qodobka 2.5 ee siyaasaddan.
II. Codsiga xubinnimo lama tixgelinayo 60 cisho ka hor Shirwaynaha ururka amma shirwaynaha aan caadiga ahayn.

III. Guddiga Maamul ee loo saaray ayaa leh awoodda qabashada codsiyada, diiwaangelinta iyo sidoo kale go'aan qaadasho ee codsiyada xubinnimada, iyaga oo si buuxda u eegaya siyaasaddan iyo Shuruucda SOLJA.

3.4 Aqbalaadda xubinnimada

I. Xubinnimada ansaxa ahi waxay ku xidhan tahay aqbalaadda guddi-hoosaadka loo xilsaaray, buuxinta shuruudaha iyo dhammaystirka qaadhaanka.
II. Xubin walba oo codsigeeda/codsigiisa la ansixiyey, waxa uu ansax ku noqonayaa aqlabiyadda go'aanka guddiga loo xilsaaray ee Xubinnimada, marka laga reebo qofka farsamada ah, waxay leeyihiin xubnuhu cod isku mid ah.
III. Guddidu waa in muddo ugu badnaan laba toddobaad ah qabsadaan, si ay u dhammaystiraan hannaanka diiwaangelinta iyo ansixinta xubinta, isla markaana xubinta is-diiwaangelisay natiijada go'aanka lagu celiyo. Go'aanku wuxuu noqon karaa in la aqbalay oo kaadhka loo soo saarayo iyo in aanu buuxin shuruudahaas.

IV. Xubintu marka ay buuxiso shuruudaha, isla markaana guddidu go'aan ku gaadho in la aqbalay xubinnimada codsadaha, iyagoo raacaya sharciga, waxa loo samaynayaa kaadhka aqoonsiga ee SOLJA, waxaana markaa ka dib lagu wargelinayaa in uu soo doonto, halka sida ugu habboon loo gaadhsiinayo xubnaha gobollada ku sugan.
V. Marka guddidu ansixiso xubinta ee nooca kaadhka uu shuruudihiisa buuxiyay/buuxisay loo soo saaro, waa inay siiyaan xubinta cusub wacyigelin hordhac ah, si loogu sheego xaqa uu SOLJA ku leeyahay iyo waajibaadka saaran ee laga doonayo xubinta.

3.5 Diidmada xubinnimada

I. Xubinta aan buuxin shuruudaha ku xusan sharciga iyo siyaasaddan, waxay guddigu xaq u leeyihiin inay u diidaan xubinnimada.
II. Xubintu waxay ku waayi kartaa jiritaanka cabasho qoraal ah oo ku saabsan habdhaqanka codsadaha, kaas oo dhaawici kara danaha amma sumcadda SOLJA. Waxaana waajib ah in loo yeedho, isdifaaco, loona sheego baadhista in go'aan laga gaadhi doono. Go'aankaasi wuxuu noqon karaa digniin, kala-noqosho xubinnimo amam inuu gar yeesho xubintu.
III. Guddiga diiwaangelinta oo hesha in xubintan hore looga saaray xubinnimada ururka, haddii aanay caddaanin in qofkaasi sifo aan sharciga waafaqsanayn

markii hore loogu diiday. Qofka markii hore sifaha sharciga baalmarsan loogu diiday, waxa uu xaq u leeyahay in dib loo eego kiiskiisa, haddii ay caddaatana la siiyo kaadhka.

IV. Kolka codsiga la diido waxa la siinayaa qoraal caddaynaya sababaha lagu diiday.

V. Codsadaha/codsatada la diido codsigiisa/codsigeeda, waxa uu haystaa hal fursad oo uu mar labaad ku soo gudbin karo codsigiisa /codsigeeda. Xubinta la diiday codsigeedu haddii aanu diidmada ku qancin, waxa uu garnaqsigiisa/garnaqsigeeda iyo sababta doodiisa uu u gudbisan karaa/kartaa boodhka sare ee SOLJA, si ay baadhis iyo dib-u-eegis ugu sameeyaan cabashada, go'aanna uga gaadhaan. Xubintu waa inuu sababeeyaa garnaqsigiisa/garnaqsigeeda.

VI. Guddidu waa in muddo toddoba cisho gudahood ah uu qofku ku helaa go'aanka cabashadiisa.

VII. Haddii codsiga xubinta aan la ansixin, go'aanka si cad ayaa qoraal loogu samaynayaa, codsadahana waa loo celinayaa lacagta diiwaangelinta.

3.6 Heerarka iyo noocyada kaadhadhka xubinnimada

Kaadhadhka diiwaangelinta ee la siinayo saxafiyiintu waxay noqon doonaan kuwo kala duwan, iyadoo lagu salaynayo khibradda iyo aqoonta saxafiga, taasi waxay suurtogelin doontaa in saxafi waliba aqoon-korodhsi iyo tartan aqooneed ka dhaxlo, si uu u gaadho nooca kaadhka ee kiisa ka duwan amma ka sarreeya.

I. Midabka kaadhkala siinayo qofka saxaafadda ku jiray muddo 10 sano iyo ka badan, wuxuu noqonayaa *Akhtar/Cagaar.* Waxa kale oo la siin karaa kaadhkan saxafiga derejada koowaad ee waxbarashada (Master) ku haysta saxaafadda. Qiimeyn baa dadka kaadhka sifahan ku qaatay lagu samaynayaa saddexdii (3) biloodba hal mar.

II. Midabka kaadhka qofka leh aqoonta saxaafadeed ee ku haysta derejada koowaad ee waxbarashada ee Bachelor Degree waxay noqonaysaa *Huruud.* Waxa kale oo kaadhka midabkan leh la siin karaa saxafiga haysta Bachelor Degree aan ahayn saxaafad iyo khibrad illaa saddex sano ah oo saxaafadda ah.

III. Midabka kaadhka la siinayo qofka saxaafadda ku shaqaynayay saddex sano illaa sagaal sannadood ee aan lahayn aqoon saxaafadeed oo heer jaamacadeed ah waxa uu noqonayaa *'Caddaan'.* Waxa kale oo kaadhka midabkan leh la siinayaa qofka muddadaas ku jiray ee khibradda leh inta u dhaxaysa 3 sanno ilaa 9 sannadood.

IV. Midabka kaadhka la siinayo ardeyda Jaamacadda Hargeysa ee saxaafadda barata/dhigata amma jaamacado kale oo saxaafadda bixiyaa haddii ay soo kordhaan, wuxuu noqonayaa *Bunni.* Kaadhkaasi wuxuu noqonayaa mid ku-meel-gaadh ah oo muddadiisu tahay lix bilood, waxaana lagu caddaynayaa inuu yahay arday barta saxaafadda iyo magaca jaamacadda uu ka dhigto.

3.7 Xuquuqda xubnaha ansaxay;

I. Xubin kasta oo ansaxday waxay leedahay xuquuq, isla markaana waxa fuulaya waajibaadyo kala duwan. Xuquuqda ay xubintu ay leedahay waxa ka mid ah;

II. In qofku xaq u helo tababbarada ay SOLJA bixiso, isla markaana uu ula sinnaado xubnaha kale ee ururka wixii fursado ah ee yimaadda.

III. In xubintu ay xaq u yeelato in la dhawro xuquuqdiisa mihnadeed, isla markaana uu helo caawimooyinka ay ka mid yihiin kaalmada sharci, haddiiba dacwad lagu oogo amma uu cid dacweynayo kiisas la xidhiidha mihnadda.

IV. Xaqa u kaga qaybgeli karo shirwaynaha guud ee ururka.

V. Xaqa inuu qofku leeyahay in la doorto, waxna uu doorto, si sharciga waafaqsan.

VI. Xaqa codaynta doorasho walba oo shirwayanaha guud ah waxa uu ku xidhnaan doonaa ansaxnimada xubinimada iyo xeerarka anshaxa, dastoorka iyo siyaasadda ansaxa ah.

VII. Xubinta ku guul daraysata inay bixiso qaadhaanka xubinnimada waxay waayi doontaa xuquuqaha xubintani leedahay qodobkani waajibayey.

VIII. Falalka ka baxsan mihnadda, sida uu sharcigu dhigayo, ee qofka shaqsiga u ah, kama turjumayso, kumana salaysna xuquuaha ay waajibisay siyaasaddani.

3.8 Dib u cusboonaysiinta Xubinnimada

I. Xubinimada SOLJA waxa lagu cusboonaysiisan karaa bixinta waajibaadka maaliyadeed ee ku salaysan waqtiga.

II. Xubinimada lama cusboonaysiin doono iyado aanay jirin qaadhaan bixini.

III. Dhammaan xubnaha bixiya qaadhaanka ee SOLJA waa inay ilaashadaan dhammaan xogohooda (Waraaqahooda lacag bixineed, xubinnimo IWM), si ay u caddaato xubinnimadoodu.

IV. Xubinta aan bixin qaadhaanka muddo saddex bilood ah waxay noqonaysaa xubin aan ansax ahayn, waxaanay waayi kartaa xuquuqo ay siyaasaddan iyo

sharciguba siinayaan oo ay ka mid tahay inaanay ka qayb galin Shirwaynaha guud.

3.9 Waayitaanka Xubinnimada

SOLJA waxa ka go'an in ay gaadho heerka ugu sareeya ee anshax iyo akhlaaqeed. SOLJA waxay aaminsan tahay in xubin walba waajibkeedu yahay inay qaaddo masuuliyadda anshax iyo dhaqan ee ka saaran anshaxa mihnadeed. Kaadhadhka la bixiyay, marka laga reebo kaadhka ku xusan qodobka 3.6, faqraddiisa V oo ku saabsan kaadhka ardayda cilmiga saxaafadda ka barata Jaamacadda, waxa lagu waayayaa marka qofku la yimaaddo qodobbadan hoos ku qoran, sida waafaqsan qodobka 10aad ee dastuurka Ururka;

I. Haddii qofku dhinto.

II. Marka qofku bixin waayo qaadhaanka ururka muddo saddex bilood ah oo isku xiga sabab lagu qanci karo la'aanteed.

III. Ku-xadgudubka shuruucda iyo mabaaadii'da ururka.

IV. Samaynta falal iyo tallaabooyin ka horimanaya jiritaanka ururka iyo dhexdhexaadnimada mihnadda oo soo noqnoqda.

V. Inay ku caddaato in uu kaadhka ku qaatay sifo kale amma isagoon buuxinin shuruudaha u deggan kaadh-qaadashada.

VI. Ka bixitaan mutadawacnimo ah oo xubinta xageeda ka timaadda.

VII. Is-casilaadda iyo ka-bixitaanka mutadawacnimada ahi ee qofka xaggiisa ka timi wuxuu ansax noqonayaa in xubintu ay warqad ay ku caddaynayso ku socodsiiso guddida.

VIII. Go'aanka inta badan xubnaha hoggaanka sare (Board) waxay xubinta kaga saari karaan ururka samaynta carqaladayn ka hor imanaysa siyaasaddan iyo sharciyada, sida waafaqsan qodobka 10aad ee Dastuurka SOLJA.

IX. Xubnaha waaya xubinnimada waxa go'aanka laga gaadhay laga soo saarayaa laba qoraal oo lagu kala socodsiinayo; xubinta wayday xubinnimada iyo mid lagu socodsiinayo xoghayaha guud ee Golaha sare (Board), isaga ayaana la socodsiinaya xubnaha kale ee boodhka.

4. Qaadhaan Bixinta xubinnimo iyo Waajibaadkeeda.

4.1 Qaababka Qaadhaanbixinta:

I. Dhammaan qaadhaanka waa in lagu bixiyaa Xisaabta baanka ee SOLJA, ciddii aan awoodi karinna, si loo fududeeyo diiwaangelinta, waa in qofku ku bixin karaa ZAAD (Merchant) amma lacag caddaan ah oo uu helaa resiidh xisaab-celin ah amma caddaynaya magaca xubinta lacagta bixisay oo saddexan, taariikhda uu bixiyay, caddadka lacagta laga qaaday iyo wixii xog ah ee kale ee muhiim ah.

II. Xubnuhu waxay leeyihiin saddex doorasho kolka loo eego qayb bixinteeda bil ahaan, saddex bille ahaan iyo sannad ahaanba. Dhammaan waa inay qaddimaad noqdaan lacagtaasi, marka laga reebo qofka billaha ku bixinaya. Taasi waxay meesha ka saaraysaa in qof aan hore u bixin uu isaga oo ujeeddo leh, sida in uu shirweynaha IWM uu mar israacin karo.

III. Waaxda xisaabaadka ayaa gudbin doonta caddaymaha xubnaha bixisay, inta aan bixin iyo dakhliga la hayo. Haddii cidda loo gudbinayaa ay tahay xubintana, waxa loo sheegayaa inta laga doonayo lacag iyo inta uu bixiyay.

5. Dib u Eegidda Siyaasadda

Siyaasadda Xubinnimada waxa lagu kaabi karaa qaraar ay soo gudbiyeen inta badan Xubnaha Boodhka SOLJA.

6. Faafinta Siyaasadda.

Nuqulka siyaasaddan ayaa lagu daabici doonaa Website-ka SOLJA, waxaana la siinayaa cidda soo codsata, sida saxaafadda iyo hay'adaha ay khusayso.

DIYAARINTA: Guddida kaabista, wax-ka-beddelka iyo dib-u-habaynta siyaasaddan;

1- Saynab Maxamed Cabdi
2- Cabdifataax Ismaaciil Mursal
3- Barkhad Maxamuud Kaariye
4- Mukhtaar Cabdiraxmaan Maxamuud

Dhammaad